# Xuquuqdaada iyo Ilaalinta aad ka haysato kharashaadka Caafimaadka ee Lama Filaanka ah

Markaad hesho daryeel caafimaad oo degdeg ah ama lagugu daaweeyo bixiye caafimaad oo aan ka mid ahayn shabakaddaada adigoo jooga isbitaal ama xarun qalliin oo bukaan-socod ah oo ka tirsan shabakaddaada, waxaa lagaa ilaalinayaa kharashaadka caafimaadka ee lama filaanka ah ama kharashaadka dheelitirka.

## Maxay tahay "kharash-bixinta dheelitiran" (mararka qaarna loogu yeero "kharashka lama filaanka ah")?

Markaad la kulanto dhakhtar ama bixiye kale oo daryeel caafimaad, waxaa laga yaabaa in lagugu yeesho kharashyo jeebka laga bixiyo, sida lacag-bixin, kharash-wadaag caymis, iyo/ama kharash lagaa jari karo. Waxaa laga yaabaa inaad leedahay kharashyo kale ama aad bixiso dhammaan kharasha haddii aad aragto bixiye ama aad booqato xarun daryeel caafimaad oo aan ku jirin shabakadda qorshahaaga caafimaad.

"Shabakadda ka baxsan" waxay qeexaysaa bixiyeyaasha iyo xarumaha aan heshiis la saxiixin qorshahaaga caafimaad. Bixiyeyaasha shabakadaha ka baxsan ayaa laga yaabaa in loo ogolaado inay kugu soo dallacaan farqiga u dhexeeya waxa qorshahaaga lagula heshiiyay inuu bixiyo iyo lacagta buuxda ee adeeggu joogo. Tan waxa loo yaqaan "dheelitirka kharashka." Lacagtani waxay u badan tahay inay ka badan tahay kharashyada shabakadda ee isla adeegga waxaana laga yaabaa inaan lagu tirin xadkaaga sannadlaha ah ee jeebka ka baxsan.

"Kharasha lama filaanka ah" waa kharashka dheelitirka oo lama filaan ah. Tani waxay dhici kartaa marka aadan xakameyn karin cidda ku lugta leh daryeelkaaga sida marka aad xaalad degdeg ah qabto ama marka aad ballan qabsato aad kutagayso xarunta shabakada laakiin si lama filaan ah uu kuu daweeyo bixiye ka baxsan shabakada.

## Waxaa lagaa ilaaliyay kharashka dheelitirka ee:

### Adeegyada Degdega ah

Haddii aad qabto xaalad caafimaad oo degdeg ah oo aad ka hesho adeegyada degdegga ah bixiye ama xarun ka baxsan shabakadda, inta ugu badan ee bixiyaha ama xarunta laga yaabo inay kugu soo dallacaan waa qaddarka kharash-wadaagga caymis ee shabakada qorshahaaga (sida lacag-bixinnada iyo wadaag kharash). Laguguma soo dallici karo kharashka dheelitirka ee adeegyadan degdegga ah. Tan waxa ku jira adeegyada aad heli karto ka dib marka aad ku sugan tahay xaalad degan, ilaa aad bixiso ogolaansho qoraal ah oo aad ka tanaasusho ilaalintaada inaan la isugu dheelitirin si loogu tala galay adeegyadan xasilinta kadib ah.

### Adeegyada Qaarkood ee Isbitaalka Gudaha Shabakada ama Xarunta Qalliinka Maalin Qura lagu Sameeyo

Markaad adeegyo ka hesho isbitaalka shabakadaha ama xarunta qalliinka maalin qura lagu sameeyo, bixiyeyaasha qaarkood waxaa laga yaabaa inay ka maqan yihiin shabakada. Xaaladahan markii lagu jiro, inta ugu badan ee bixiyeyaasha laga yaabo inay kugu soo dallacaan waa qaddarka kharashka wadaagga ee shabakada qorshahaaga. Tani waxay khusaysaa adeegyada daawada degdegga ah, suuxinta, cudur-baadhista, raajada, shaybaarka, daryeelka dhallaanka cusub, kaaliyaha qalliinka, dhakhtarka isbitaalka, ama adeegyada dhakhtarka daryeelka bukaannada xaaladaha daran. Bixiyeyaashani kuguma soo dallici karaan kharashka dheelitirka waxaana laga yaabaa inaysan ku waydiin inaad ka tanaasusho

*sii socda*

ilaalintaada si aan kharashka dheelitirka loo soo dalacin.

Haddii aad adeegyo kale ka hesho xarumahan shabakada dhexdeeda ah, bixiyeyaasha ka baxsan shabakada kuguma soo dallici karaan kharashka dheelitirka, ilaa aad bixiso ogolaansho qoraal ah oo aad ka tanaasusho ilaalintaada.

**Marna lagaama rabo inaad ka tanaasusho ilaalintaada kharashaadka dheelitirka. Sidoo kale lagaagama baahna inaad hesho daryeel ka baxsan shabakada. Waxaad ka dooran kartaa bixiye ama xarunta shabakada qorshahaaga.**

## Marka kharashka dheelitirka aan la oggolayn, waxaad sidoo kale leedahay ilaalinnada soo socda:

- Adiga uun kaliya waxaad mas'uul ka tahay bixinta qaybtaada kharashka (kharash bixinta, kharash-wadaagga caymis, iyo lacagaha lagaa jarayo ee aad bixin lahayd haddii bixiyaha ama xaruntu ay ku jirto shabakad). Qorshahaaga caafimaad waxaa uu si toos ah u bixin doonaa kharashka bixiyayaasha iyo xarumaha ka baxsan shabakada.
- Guud ahaan qorshahaaga caafimaad waa inuu:
  - Bixiyaa kharashka ku baxaya adeegyada degdegga ah adigoon u baahnayn inaad oggolaansho hore u hesho adeegyada (ogolaanshaha hore).
  - Bixiyaa adeegyada deg-degga ah ee bixiyeyaasha ka baxsan shabakadda.
  - Ku saleeyaa waxa bixiyaha ama xaruntu kugu leedahay (kharash wadaaga) waxa uu ku bixin lahaa bixiyaha shabakada ama xarunta oo uu muujiyo cadadkaas sharaxaadaada faa'iidooyinka ku jira.
  - Tiriyaa qaddar kasta oo aad ku bixiso adeegyada degdegga ah ama adeegyada shabakadaha ka baxsan xagga xadkaaga lagaa jarayo iyo kan ka baxsanba jeebka.

## Haddii aad aaminsan tahay in si khaldan laguu soo dallacay, waxaad la xiriiri kartaa:

**Xafiiska Caymiska ee Gobolka Maine**
207-624-8475, ama 800-300-5000
(lacag la'aan)

**Macluumaadka Xafiiska Caymiska NH**
603-271-2261, ama (800) 852-3416
(lacag la'aan)
iimayl: consumerservices@ins.nh.gov

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan xuquuqdaada sida waafaqsan sharciga federaalka booqo: **cms.gov/nosurprises/consumers**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada sida waafaqsan sharciga gobolka booqo: **maine.gov/pfr/insurance/**

MaineHealth